



Sababtee ayay ardayda u tixgeliyaan inay shaqo tababar ah la sameeyaan CRS? ▼

Arag shaqo-maalmeedka hay'ad federaal ah Indha-indheyn ku samey sida CRS xafiis 15keeda xafiisyo ka mid ah ay ugu adeegto waddanka

Ra'yi gaar ah ka hel shaqada iyo howlgalka CRS

Ka shaqee mashruucyo daboolo qeybo shaqo ee kala duwan

Ka qeybgal kulanno iyo munaasabado shaqaalaha ah si aad u ballaarisoo aqoontaada dowladda iyo siyaabaha loo xaliyo iskudhaca

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada

Kamid Noqo Xalka

Tababar Shaqo ka codso Nabadoonka Mareykanka

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS) waxay raadinayaan arday aqoon kala duwan leh ee daneynaya inay la shaqeeyaan "Nabadoonka Mareykanka" oo ka shaqeeya bulshooyinka waddanka oo dhan. Barnaamijka CRS ee tababarka shaqo, ardayda waxay helaan waayo-aragnimo ah la shaqeynta hay'ad federal ah ee saameyn ku leh waddanka oo dhan – ka caawineysa ka hortagga iyo ka jawaabidda isku-dhaca, xiisadda, dambiyada naceybka, iyo caqabada kale ee maanta wajahayo bulshadeena.

Dulmarka Barnaamijka Tababarka Shaqo oo si Tabaruc ah ee Ardayga ▼

Waa kuma: Waa kuma: Ardayda ku jirta jaamacadda heerka koowaad, labaad iyo kuwa baranya garyaqaanimada (law school) oo aadka u jecel inay xoojiyaan xiriirka bulshada ayagoo caawinaya howlgalka CRS, lana shaqeynaya dowladaha gobolka iyo deegaanka, ururada dadweynaha iyo kuwa qaaska ah, iyo kooxaha bulshada iyo hormuudka.

CRS waxay aqbashaa dhammaan codsiyada taqasuska jaamacadaha (maaddo kasto).

Xagee ailan: Ardayda waxay Shaqada tababarka ka codsan karaan Xarunta CRS ee Washington, D.C., ama mid kamid ah 10ka xafiis ee ku yaallo gobolada waddanka. Ka fiiri meelahaas khariiradda bogga dambe ku qoran

Goorma: CRS waxay codsiyada shaqada tababarka aqbashaa sanadka xilliyada xagaaga, dayrta, iyo guga oo dhan.

Shuruudaha:

- Shaqsi Mareykan ah
- 18 jir ama ka weyn
- Hadda uu ku jiro jaamacada heerka koowaad, labaad, ama yahay arday barta garyaqaanimada
- Waa inuu ku baaso baaritaan (background check) kahor inta la aqbalin

(baaritaano ammi oo qaadan kara ilaa afar bilood)



La shaqeynta CRS ma aha kaliya inay i siisay fahan guud oo nidaamka cadaalada ah, laakiin waxaa kale aan ka faa'iday inaan si hoose u ogaado waxqabadka CRS. CRS waxay ahayd meel aan jacelykega arimaha xuquuqda rayidka iyo daneynteyda xoojinta wada xiriirka bulshada, xal u helida bulshada iyo howlqabadka wanaagsan ee dowladda isku keentay. JAIPREET SETHI

Maxay: Noocyada casharada la-tababaraha waxa laga yaabaa inay ku kala duwanaato goobta xafiisku yahay. Tusaalooyinka waxa ku jira:

- ▶ **Ka caawinta madaxda sare iyo shaqaalaha** cilmi barista iyo qoraalka, barnaamij qiimeynta, dib u eegida kiisaska, howsha, iyo falaqeynta siyaabaha loo xaliyo iskudhaca bulshada.
- ▶ **Ka caawinta la Taliyeyaasha Sharciga** dib u eegista fahmida wareegtooyinka la xiriira kiisaska iyo ka jawaabida codsiyada macluumaadka (Freedom of Information Act) iyo cilmi baarista sharciga.
- ▶ **Ka caawinta shaqaalaha** gobolada qorsheynta iyo gaarsiinta adeegyada CRS iyo ka qeybgalka kiisaska bulshada deegaanka si looga caawiyo dajinta xiisada ka imaanaysa dhacdooyinka eexashada ama dambiyada naceybka.

Sidee: Codso adigoo email ku dirayo CRSInternCoordinator@usdoj.gov:

- Resume
- Qoraal kooban (cover letter) oo sharraxaya daneyntaada CRS, waqtiga lagu heli karo, iyo xafiiska aad door bideyso meesha uu ku yaallo
- Galka (transcript) jaamacada aad hada aado

Waxaan kugula talineynaa inaad codsiga dirto afar bilood kahor waqtiga aad filayso inaad bilaawdo.

Waa Ayo CRS ▼

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaataada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

Adeeyada iyo Barnaamijyada CRS ▼

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

Xagee ka Shaqeynaa ▼

Xarunta CRS 📍

Washington, DC

Xafiisyada Gobolada CRS 📍

New England

Boston, MA

Waqooyi-bari

New York, NY

Atlantiga-Dhexe

Philadelphia, PA

Konfur-bari

Atlanta, GA

Galbeedka-dhexe

Chicago, IL

Konfur-galbeed

Dallas, TX

Dhexda

Kansas City, MO

Buuraleyda

Denver, CO

Galbeedka

Los Angeles, CA

Waqooyi-galbeed

Seattle, WA


Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada 📍

Miami, FL

Houston, TX

Detroit, MI

San Francisco, CA



Naga hel, nagala xiriir ▼

www.justice.gov/crs



[facebook.com/DOJCRS/](https://www.facebook.com/DOJCRS/)



[@DOJ_CRIS](https://twitter.com/DOJ_CRIS)



askcrs@usdoj.gov



202.305.2935